



## Ride to Care: Xuquuqdaada & waajibaadkaaga

### Xubnaha ka tirsan Ride to Care waxay xaq u leeyihiin in:

- Ay helaan gaadiid ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo oo buuxinaya baahiyahaaga.
- Ay helaan adeegyada turjumaada.
- Ay helaan waxyaabo ku qoran luqad ama qaab buuxinaya buuxinaya baahiyahaaga.
- Aanay takoorin darawaliinta, shaqaalaha ama rakaabka kale ee Ride to Care.
- Ay soo qaataan xayawaanka la adeegsado ama shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed hadba sida loogu baahdo. Fadlan xarunta wicitaanka u sheeg in aad qorsheynayso soo wadashada qof adeeg bixiya ama xayawaanka la adeegsado.
- Aad soo qaadato dhowr waxyaabood haddii loo baahdo, laakiin aysan badnaan. Tusaale, waxaad soo qaadan kartaa:
  - Saddex ah bacaha lagu soo adeegto, ama
  - Hal sanduuq oo cunto ah, ama
  - Laba shay oo la qaato
- Lagugu qaado qalabka socodka ‘mobility device’ ee aad dooranayso (sida mootada yar ‘scooter’).
- Ay codsadaan caawimaada dhanka suunka gaariga ama kordhiyaha suunka gaariga.
- Aad hesho adeeg wakhtiga ku habboon.
- Ay dadka la wadaagaan bogaadinta ama soo gudbiso cabashooyinka ku saabsan adeegaaga.
- Ay gudbiyaan rafcaan ama codsato dacwad dhageysi (ama labadoodaba) haddii aad dareensan tahay in adeega laguugu diiday si cadaalad darro ah.
- Ay helaan ogeysiin qoraal ah marka safar la diido.

### Waxaanu ka filaynaa rakaabka Ride to Care in:

- Ay u muujiyaan xushmad dhammaan shaqaalaha, darawaliinta iyo rakaabka kale ee Ride to Care. Xadgudub ama luqad la isku cabsi gelinayo ama hab-dhaqan lama oggola.
- Ay qaataan waxyaabaha ay iska leeyihiin ama kaga tagaan gaariga, xataa haddii aad is leedahay qof ayaa kuu soo qaadi doona. Fiiri kursiga iyo sagxada dhulka ee kuu dhow wixii la xiriira waxyaabaha gaarka loo leeyahay.
- Ay oggolaadaan in ay had iyo jeer xayawaanka la adeegsado ka dhigaan kuwo la xakameeyo. Xayawaanka la adeegsado looma oggola kuraasta rakaabka korkooda.
- Ay xayawaanka laga helo taageerada niyadeed ama xayawaanka la korsado ku hayaan shay wax lagu qaado oo xiran.

- Ay hore u soo wacaan haddii ay tahay in aad isbeddel ku sameyso ama joojiso safar. Fadlan Ride to Care ka wac 503-416-3955 ama 855-321-4899 sida ugu horreysa ee aad awoodi karto.
- U sheegaan xarunta wicitaanka haddii aad u baahan tahay meel joogsi dheeraad ah, sida farmashiyaha. Waa in aad hore u sii codsato meel joogsi. Waxaa dhici karta in ay darawaliintu sameeyaan meel joogsi hore laga sii oggolaatay oo kaliya.
- Ay u diyaar garoobaan qaadistaada marka la joogo waqtiga Ride to Care ku siiyo. In lagu yimaado waqtigii loogu talagalay waxay qof kasta ka caawinaysaa in uu jidka toosan ku taagnaado: adiga, darawalka iyo gaadiid raacayaasha kale.
- Ay oggolaadaan in aysan isticmaalin mukhaadaraad ama aalkolo inta lagu dhex jiro gawaarida Ride to Care.
- Ay oggolaadaan in aysan ku cabin sigaar ama waxyaabaha la nuugo ‘vape’ iyada oo lagu dhex jiro ama meel u dhow gawaarida Ride to Care ama darawaliinta. Fadlan joog meel gaariga u jirta ugu yaraan 25 feet.
- Ay oggolaadaan in aysan ku lug yeelan falal sharci darro ah marka lagu dhex jiro ama loo dhow yahay gawaarida Ride to Care ama darawaliinta, ama xubnaha kale.
- Ay xirtaan suunka gaariga, iyada oo la ilaalinayo sharciga Oregon.
- Ay oggolaadaan in ay xirtaan maaskaro iyo waxyaabaha kale ee wajiga la gashado ee sankaga iyo afkaaga korkiisa labadoodaba. Tani waa mid dhaqan gal ah inta ay jirto xaalada caafimaad ee degdega ah, si aad naftaada iyo ta dadka kale uga ilaaliso COVID-19.
- Aysan ka lug yeelan dabeecado takooraya darawaliinta ama shaqaalaha, ama rakaabka kale ee Ride to Care.
- Ay keenaan cabbirka saxda ah ee kursiga badbaadada ee loogu talagalay wixii carruur ah ee kula socda. Waxaad rakibi doontaa kursiga oo ilmaha ku adkeyn doontaa kursiga. Fiiri Buuga Raacaha Ride to Care ee ku saabsan shuruudaha kuraasta badbaadada. Fadlan kursiga badbaadada ee ilmaha ka saar gaariga marka la joogo dhammaadka safar kasta. Aysan waxyaabaha gaarka loo leeyahay kaga tagin gaariga.
- Ay cuntada ama cabitaannada ku hayaan weel xiran, oo aanan lagu dhex isticmaalin gaariga. Waxaa dhici karta in lagu oggolaado cunto fudud oo yar haddii aad u baahan tahay iyada si aad u maareyso xaalad caafimaad.
- Ay wax hore ka sii qorsheystaan oo soo qaataan cunto (si ay u cunaan inta lagu jiro joogsiga) iyo daawooyin haddiiba ay jiraan safaro dhaadheer ama dib u dhacyo aan la filayn.
- Ay macluumaad sax ah siiyaan Ride to Care iyo bixiyayaasha gaadiidka aan leenahay. Tani waxay wanaajin doontaa adeegyada aad hesho.